Kaarka barnaamijyada 2021

Kaarka barnaamijyada ee degmada Sandefjord

Kaarka barnaamijyada waa wada shaqeyn ka dhaxeysa jilayaasha gaarka loo leeyahay ee degmada Sandefjord iyo NAV. Qorshahan waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in carruurta iyo dhalinyarada ka socota qoysaska dhaqaalahoodu liito ay helaan fursado fiican oo ay kaga qeyb galaan howlaha dhaqanka iyo madadaalada.

Shaqsiyaadka loogu talagalay

Kaarka barnaamijyada waxaa la siin karaa carruurta iyo dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 2-18 sano ee qoysaska dhaqaalahoodu liito. Sanadka 2021, degmada Sandefjord waxay haysaa 450 kaar oo la qaybiyo. Hal kaar ayaa loo qoondeyn doona halkii carruur/dhalinyaro. Waa la qiimeeynaa inta kaar ee qoysku heli doono. Laakin qoysaska leh carruur badan ayaa loo qoondeyn karaa kaarar badan.

Foom codsi oo fudud ayaa ka heli kartaa hoos, foomkan waa in la daabaco, la buuxiyo lana geeyo xafiiska NAV, foomka iyo dukumiintiyo. Codsiyada la soo gudbiyo iyada oo aan la helin dukumiinti lagama shaqeyn doono.

Cinwaanka booqashada ee NAV Sandefjord waa: Thor Dahls gate 1/5, 3210 Sandefjord.

Shuruudaha abaalmarinta

Marka lagu daro duruufaha dhaqaale oo keliya, waxay noqon doontaa mid ku habboon tixgelinta arrimaha bulsho oo kala duwan, abaal marinta waxay markaa noqon doonta isku-dar ah shuruudaha dhaqaalaha iyo bulshada

Kaarka barnaamijyada boostada ayaa loogu dirayaa qoysaska isticmaala NAV, waxaana la socdo warqad macluumad ah.

Warqadas, dadka isticmaala waxaa lagu wargelinayaa fursada iyo xaddidadaha ku jira kaarka.

Waxyaabaha ku jira

10 tikidh oo 50 kroner ah oo loogu talagalay bandhigyada shineemooyinka ee guriga dhaqanka Hjertnes.

5 tikidh ah barnaamijka dhaqanka carruurta. Wehelka ama qofka la socda carruurta ayaa si bilaash ah ku geli karo.

10 booqasho barkadda dabaasha ee sandefjord. Wehelka ama qofka la socda carruurta ayaa si bilaash ah ku geli karo.

10 booqasho goobta Bugårdsparken oo golf lagu ciyaaro. Halki cunug hal mar ayaa la xisaaba.

Kaliya ilmaha / dhalinyarada ee haysta kaarka ayaa isticmaali karo fursadahan. Suurtagal ma ahan in tigidhyada la siiyo asxaabta carruurta / dhalinyarada haysta kaarka.

Intaa waxaa sii dheer, oo ku jira kaarka:

- Ka mid noqoshada iyo khidmadda tababarka hal urur/koox / xarun jimicsi sanad kasto
- Ka qeybgalka koobabka iyo dhacdooyinka kale ee hoos yimaada ururka ama kooxda
- Qarashka qalabka si gaar ah loogu talagay ka mid noqoshada uruka/kooxda

Xusuusin: Waa kooxda, uruka ama xarunta jimicsiga ayaa ka codsan doonta qarashka degmada Sandefjord, iyadoo la adeegsanayo foom codsi fudud. Waxaa laga wadaa mesha iska diiwangelin rabto ayaa ku codsanaayso iyago ku hadlaya magaca dadka isticmaala, codsiyada waxaa lagu calaamadeeyaa lambarka kaarka, laguma qorayo magac.

Kooxaha, ururada iyo bixiyeyaasha kale

Kooxaha iyo ururada qaata deeqaha degmadu waxay ku yihiin qasab inaay aqbalaan kaarka barnaamijyada. Kooxaha iyo ururada kale ee doonaya inay ka qeyb qaataan qorshahaan iyagaa go'aanka bandhigooda leh.

Goobaha isticmaalka markii kaar la isticmaalo calamad ayaay u yeelayaan iyo foomka isticmaalida. Tani waxay na siinaysa fursad aan ku helno aragti guud oo ku saabsan inta kaarka si dhab ah loo isticmaalo, oo markaa waxay sahlaysaa qiimeynta qorshaha.

Aqoonsi la'aan iyo qarsoodi

Isticmaalaha kaarka barnaamijyada ayaa la ilaalin doona macluumadkiisa, degmadu ma doonayso inay dhisto qroshe aay maareeyntiisa aad u adag tahay.

Sida lo ilaaliyo waajibaadka astuurnaanta, kaararka waxaay leeyihiin lambar. Balse laguma calaamadeeyo magacyo, NAV kaliya ayaa heyso macluumadka guud ee isticmaalayaasha. Markaa waxa la raba kooxaha iyo ururada, shaqaalaha tikidhada iyo kuwa kale oo u bahan inaay la xarriiran isticmaalayasha waa inaay ula dhaqmaan si tixgelin iyo xikmad leh.

Markay isticmaaleyaashu u isticmaalaan karaka inay iska diiwaangeliyaan ama ka mid noqdaan kooxaha iyo ururada, waa in lagu sameeyaa shuruudaha caadiga ah, balse sida ugu fudud oo suurtogalka ah, sida, maareeyaha iyo shaqaalaha khasnajiga oo kaliya inaay ogaadan in shaqsiga uu haysto kaarka baarnamijyada.

Maamulka qorshahaan

NAV waxay leedahay dulmar guud iyo aqoonta kuwa haysta kaarka. Sidaas darted NAV oo kaashanaysa kooxda kalkaalisada gooba caafimadka ama adeegga daryeelka carruurta ayaa doorta dadka isticmaali doono waxayna siisaa kaarka barnaamijyada. NAV waxay dulmar guud ku sameeyn doonta isticmaaleyaasha iyo lambarka kaarkooda.

Cinwaanka booqashada ee NAV Sandefjord waa: Thor Dahls gate 1/5, 3210 Sandefjord.

Xidhiidhka lala yeelanayo bixiyeyasha / goobaha isticmaalka iyo ka baaraandegista codsiyada, kaabista khidmada barnaamijyada kala duwan, iyo wixii la mid ah waxaa gacanta

ku haya qaybta dhaqanka. Codsiyada waa laga shaqeeyna si joogta ah. wixi qarash ahna waxaa si toos ah loogu shubaa goobaha isticmaalaha. Sidoo kale waa qaybta dhaqanka waxaa haysa muuqaalka guud qarashka kaararka, si uu kaar kastaa aanu u helin deeq ka baxsan inta lagu sheegay. Isticmaalayaasha sidaas darteed waa inaay ku wargaliyaan oo aay tixgeliyaan qarashka xaddidan iyo goobaha ay doonayaan inay u adeegsadaan kaarka.

Faahfaahin guud oo ku saabsan kooxaha iyo ururada iyo goobaha loo isticmaali karo kaarka ee ka qayb qaadanaya qorshahan. Fadlan tixraac bogga internetka ee degmada. Halkas oo wixii dheeraad ah sida dugsiga kubbada cagta, iskuulada dalxiiska iyo wixi dheeri ah oo lagu dari karo halkan ayaa lagu dhajiyaa.